

Aragtiyaha ilmaha iyo Dookhyada

Isbeddelada *Xeerka Furiinka* waxay dhaqan geli doonaan Maarso 1, 2021. Qaar ka mid ah isbeddeladan waxay caawin doonaan waalidka, qoysaska, xirfad yaqaanada cadaalada iyo garsoorayaasha inay ka fekeraan aragtiyaha ilmaha iyo dookhyada marka go'aan la gaadhayo ku saabsan masuuliyada daryeelka waalidka.

Dhokumentigan waxa uu:

- ku soon doonaan qaybo macluumaad ah oo ku saabsan sababta ay muhiim u tahay in la dhagaysto carruurta arrimaha sahciga qoyska, oo
- kaa caawiya inaad fahanto *Xeerka Furiinka* kaas oo ka higa aragtiyaha ilmaha iyo dookhyada ka fiirsashada muhiimka ah ee go'aan ka gaadhida danaha ugu wanaagsan ee ilmaha

Boggana

- **Aragtida ilmaha iyo dookhyada waafaqsan *Xeerka Divorce***
- **Sababtee ayay dhagaysiga carruurta muhiim u tahay**
- **Tusaalooyinka qaababka kala duwan ee war looga maqlo carruurta ka dib kala maqnaanshaha ama furiinka**
- **Adeegyada cadaalada qoyska ee gobolkaaga**

Aragtida ilmaha iyo dookhyada waafaqsan *Xeerka Divorce*

Waa muhiim in la hubiyo in go'aamada ku saabsan daryeelka waalidka furiinka ka dib la gaadho ay yihiin danaha ugu wanaagsan ee ilmaha. *Xeerka Furiinka* cusub waxa uu leeyahay tirada asbaabaha lagugu caawiyo adiga oo maxkamaddu waxay go'aan ka gaadhaa waxa u wanaagsan ilmahaaga xaaladaada gaarka ah.

Mid ka mid ah asbaabahan waa aragtiyaha carruurta iyo dookhyada. Miisaanka la siiyay aragtiyaha ilmaha iyo dookhyada waxay ku tiirsanaan doonaa da'da ilmaha iyo waynaanta ilmaha. Markay carruurta waynaadaan, aragtidooda iyo dookhyada caadi ahaan waxaa la siiyaa miisaan wayn, laakiin ilma kasta waa gooni oo waxa uu ku horumaraan qaab socodkooda.

Wakhtiyada qaarkood waydiisanaya aragtida iyo dookhyada ma noqon karaan shayga saxda in la sameeyo, tusaale ahaan haddii ay da' yar yihiin oo aanay awoodin inay sameeyaan aragtiyahooda. Haddii adiga ama waalid kale khilaad badan idiin dhexeeyo, ilmahaagu waxa uu u baahan doonaa cawimada qof sida shaqaalaha bulshadda si loo wadaago aragtiyahooda.

Ma jirto da' gaar ah – sida 12 ama 14 – marka carruurta ay go'aan ka gaadhaan cida ay la noolaanayaan.

Ilma kastaa waa mid gooni ah, oo aragtidoodu waa hal sabab oo garasoorahu ka fekerayo marka go'aan laqa gaadhayo in

Wixii macluumaad dheerada ah ee ku saabsan daryeelka waalid qaban qaabadiisa iyo danaha ugu fiican ee asbaabaha ilmaha, fadlan arag: hagitaanka qaban qaabda daryeelka waalidka ka dib kala maqnaanshaha ama furitaanka.

Sababtee ayay dhagaysiga carruurta muhiim u tahay

Carruurta waxay leeyihiin xaqa ay ku muujiyaan aragtidooda dhammaan arrimaha saameeya iyaga, gudaha mackamadda dacwadaha maamulka ah. Tan waxaa la bixiyay Qaramada midoobay *Shir waynaha Xuquuqda Ilmaha*, kaas oo Canada ay noqotay qayb ka mid ah 1991, dhammaan carruurta Kanadiyaanka ah waxay leeyihiin xaqa ilaa inta ay samayn karaan aragtiyahooda. Miisaan badan waa in la siiyo aragtidooda markay koraan oo waynaadaan

Go'aamada waalidka iyo garsoorayaashu ka gaadhaan daryeelka waalidka si toos ah waxay u saameeyaan carruurta inay helaan fursada ay ku wadaagaan aragtiyahooda ku saabsan go'aamadan. Cilmi baadhidu sidoo kale waxay muujisay carruurta inay si wanaagsan ula qabsadaan kala maqnaanshaha waalidkooda marka ay hayaan fikrada ay ku muujiyaan aragtiyahooda.

Carruurta qaarkood waxay doonayaan inay sheegaan wax ku saabsan qaban qaabada daryeelka waalidka ama furitaanka waa wax faa'iido leh in carruurta si ballaadhan loogala hadlo waxa iyag u muhiimka ah. Tan waxaa ka mid ahaan kara habkooda maalinlaha ah ee caadiga ah iyo hawlaha, tusaale ahaan waa muhiim in la iska ilaaliyo carruurta in si toos ah su'aalaha cadaadis loogu saaro iyaga, tusaale ahaan, cida ay doonayaan inay la noolaadaan. Tani waxay ka dhigi kartaa inay dareemaan inay kala dooranayaan adiga ama waalidkooda.

Sidoo kale waxaa jira qaybo carruurta ah oo aan doonayn inay la wadaagaan aragtiyahooda waalidkooda ama qof kale. Taasina waa sax sidoo kale.

Ka helida rayi carruurta macnaheedu maaha inaad waydiinayso iyaga wax ku saabsan go'aamada qaban qaabada daryeelka waalidka ama u sheegida iyaga inay dhinacyo kala raacaan. Waa muhiim in carruurta fahanto faraqa u dhexeeya siinta fikradooda iyo go'aan gaadhida.

Qaababka kala duwan ee loo dhegaysto carruurta ka dib kala maqnaanshaha ama furitaanka

Waa jira qaabab badan oo kala duwan oo lagu dhegaysto carruurta. Waa muhiim in la helo aragtida ilmahaaga macno ma leh sida aad go'aamada u gaadhayso ku saabsan qaban qaabada daryeelka waalidka.

Way wanaagsan tahay haddii waalidku ay go'aan ku gaadhaan sida carruurtoodu ugu lug lahaanayso. Waxaad go'aan ka gaadhi kartaa inaad waydiiso aragtiyaha ilmahaaga toos ka dib marka aad go'aan ku gaadho inaad kala maqnaataan. Waxaad sidoo kale go'aan ku gaadhaysaa inaa dhesho aragtidooda in ka badan hal mar marka aadka shaqayso inaad xaliso arrimaha daryeelka waalid. Waxaad sidoo kale go'aan ka gaadhaysaa inaadka qayb geliso ilmahaaga nidaamka maxkamadda, sida dhexdhexaadinta.

Ka ilaali carruurtaada inaad waydiiso su'aalaha sida "kumaad rabtaa inaad la noolaato"?

Tani waxay dhigtaa badhtanka khilaafka.

Halkan waxaa ah qaybo tusaalooyinka looga qayb gelayo ilmahaaga haddii aad samaynayso qaban qaabada daryeelka walaidka addoon maxkamadda tegin:

- waalidka (fikrad ahaan wada jir) ula hadalka carruurta
- carruurta la wadaagaysa aragtidooda xirfad yaqaanaka, sida sahqaalaha bulshadda, khabiirka cilmi nafsiga, ama dhakhtarka dhimirka, kaas oo ka warbixin doonaa aragtiyahooda, iyo/ama
- dhexdhexaadinta ama nidaamyada xalka khilaafka kale ee qoyska ee ku lugt aleh carruurta, tusaale in dhexdhexaadiyahaagy la hadlo ilmahaaga oo dib ugu soo celi aragtidooda kullmada

Halkan waxaa ah qaybo tusaalooyinka looga qayb gelayo ilmahaaga hadidi aad tegayso maxkamadda:

- qiimaynta qorshaha daryeelka waalid ee ku jirta waraysiyada xirfad yaqaanka daryeelka caafimaadka
- warbixinta aragtiyaha ilmaha ee ku salaysan hal ama labba waraysiyada ilmaha ee kooxda saddexaad ee dhexdhexaadka ah ee takhasuska leh, sida shaqaalaha bulshadda, qareenka ama la taliyaha caafimaadka.
- qareenka ilmaha iyo/ama
- waraysiga ilmaha ee garsooraha

Sidoo kale waa muhiim in la sii wado dhegaysiga carruurta *ka dib* go'aan gaadhida ku saabsan masuuliyadaha daryeelka waalidka. K afeker wax ku saabsan saamaynta khilaafka ay ku leedahay ilmaha oo isku day inaad xaliso khilaafyada ku saabsan masuuliyahada daryeelka waalidka si nabad ah.

Waxaa jira tiro qaabab ah oo aad ku xalin karto dhibaatooyinka ka dib marka aad go'aan gaadho adiga oo aan maxkamadda tegin. Tusaale, waxaad ku lug lahaan kartaa carruurta isku xidhka daryeelka waalid, nidaamka xooga saara ilmaha si loo xaliyo khilaafyada daryeelka waalid ee soo baxa ka dib markaad go'aan gaadho ama dalbo wax ku saabsan wakhtiga daryeelka waalidka, masuuliyadaha waalidka ama xidhiidhka u dhexeeya iyo dadka kale ee muhiimka ka ah noloshu ilmaha. Isku xidhka daryeelka waalid waxa uu adeegsan karaan isku darka dhexdhexaadinta iyo dhexdhexaadiska si loo xaliyo khilaafyada daryeelka waalidka.

Macluumaadka dheeraadka ah ee qoyska nidaamyada xalka khilaadka, fadlan la tasho Xaashida xogta - Xalka khilaafka qoyska: xalinta arrimaha sharciga qoyska ee ka baxsan maxkamadda.

Waalidku sidoo kale waxaa waajib ku ah:

- in go'aan laga gaadho danaha ugu muhiimsan ee ilmahooda (dhegaysigoodu waa uu caawin karaa), iyo

- kuma lug laha carruurtooda khilaadyadooda (tusaale ahaan, waalidku waa inaanay duubin wada sheekaysiyada ay la yeeshaan ilmaha wixii ah isticmaalka suuragalka ah gudaha dacwadaha maxkamadda qoyska, ama waydiita ilmaha inuu u qaado fariimo waalidka kale)

Macluuumamadka dheeraadka ah ee waajibaadyada waalidka waafaqsan *Xeerka Furiinka* cusub, fadlan arag, <https://www.justice.gc.ca/eng/fl-df/pub.html>.

Ma jirto qaabka “hal cabbir oo leeg dhammaan” si ay ugu lug lahaata go’amada carruurta daryeelka waalid ka dib kala maqnaanshaha ama furiinka. Waa muhiim in laga fekerro wax ku saabsan waxa aad ugu habboonaan lahaa ilmahaaga xalkaaga.

Adeegyada cadaalada qoyska ee gobolkaaga

Adeegyada cadaalada qoyska miduun waa adeegyada guud ama gaarka ah oo loogu talo galay inuu ka caawiya dadka inay wax ka qabtaan arrimaha ka soo baxa kala maqnaanshaha ama furitaanka.

Gobolada iyo dhulalku waxay leeyihiin adeegyada cadaalada qoyska la xidhiidha dhegaysiga carruurta aragtidooda siiba adeegyada sida dhexdhexaadinta iyo kullamada macluumaadka daryeelka waalidka ee aad ka heli karto ee aad u waxtar badan. Waxaad ka heli kartaa adeegyada caawinta badan ee kale websaydka dowladaada gobolka ama dhulka. Hoosta *Xeerka Furitaanka* cusub, la taliyayaashu waxaa waajib ku ah inay ku wargeliyaan macaamiisha adeegyada cadaalada qoyska taas oo caawimo u noqon karta iyaga.

Linkiyad ala xidhiidha

- Qaban qaabda daryeelka waalidka ka dib kala maqnaanshaha ama furitaanka
- Samaynta Qorshayaasha haqitaanka qaban qaabda daryeelka waalidka ka dib kala maqnaanshaha ama furitaanka
- Liiska magacyada Qorshaha Daryeelka waalidka
- Sababtoo ah noloshu way Socotaa . . . Caawinta Carrurta iyo Dhalintarada Noloshooda ee Kala maqnaanshaha iyo Furitaanka
- Xalka khilaafka qoyska: xalinta arrimaha sharciga qoyska ee ka baxsan maxkamadda
- Furitaanka iyo Rabshadda Qoyska